

Isbuuclaha BSD ee Nofeembar 2, 2020

Mckay PTO waxay diyaarisaa miisas waxayna u qaybisaa ardayda

<https://youtu.be/goz8eK4XUlc>

Waxaan u Dabaaldegnaa Iskaashiga Bulshada

Waaxda Isgaarsiinta & Ka Qeybgalka Bulshada oo ay weheliyaan maamulayaasha iskuulada iyo xubnaha bulshada ayaa sharfay wada shaqeynta wanaagsan sanad dugsiyeedka 2019-20 ee xaflada khadka ah ee WE Awards.

Isbuucyada soo socda, waxaan soo bandhigi doonnaa kuwa ku guuleysta. Maanta, waxaan ku maamuuseynaa Dugsiga Hoose Nancy Ryles iyo PTO-da dadaalkooda Kooxda Cagaaran. https://youtu.be/ltszOiKc_3s

Daqada Codsiga Kaabista Daryeelka Carruurta ayaa Hadda Furan

Sida aan isbuucii hore sheegnay, Degmada Washington waxay deeq ka heshay Sharciga DARYEELKA ee federaalka si ay u siiso kabida daryeelka caruurta waaliddiinta / masuulada. Dugsiga Degmada Beaverton wuxuu u qaybin doonaa qiyaastii \$ 2.4 milyan qoysaska u qalma ee codsada kaalmooyinkan.

Daaqadda dalabka ayaa hadda u furan in laga dalbado khadka tooska ah si loo helo lacag kaa caawiyo daboolidda qaar ama dhammaan kharashyada daryeelka carruurta ee aad jeebkaaga ka bixisay: <https://www.beaverton.k12.or.us/child-care-subsidy>

Haddii aadan haysan internet, waxaad ka qaadan kartaa codsi warqad ah iskuulkaaga ama Xafiiska Degmada (16550 SW Merlo Drive, Beaverton).

Hadii aad su'aalo qabto, wac 503-793- 0408, ama dir email child-care-subsidy@beaverton.k12.or.us. Haddii aad u baahan tahay caawimaad tarjumaad, wac Waaxdeenna Luuqadaha kala duwan 503-356-3755.

Lacagaha waa la qaybin doonaa ilaa ay ka dhamaadaan. Dantaada ayey ku jirtaa inaad hore u dalbato.

Bandhiga Khtiyaaraadka Barashada ee Khadka ah

Jimcaha, Nofeembar 6, Bandhiga Fiidiyowyada macluumaadka ee iskuuladeena ikhtiyaariga ah - ACMA, BASE, ISB iyo Rachel Carson - waxaa laga heli karaa websaydhkooda. Fadlan la xiriir dugsiga aad xiiseyneyso si aad u hesho faahfaahin.

Raleigh Hills iyo Springville, ma jiri doonaan bandhig sannadkan sababo la xiriira joojinta qaabka K-8. Haddii aad xiiseyneyso inaad codsato fasalka 7aad ama 8aad, fadlan wac dugsiga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo taariikhaha muhiimka ah, fadlan booqo [Learning Options webpage](#).

Talooyinka Gudiga La Talinta Toosinta Xuduudaha ee Dugsiga Dhexe

Khamiista, Oktoobar 29, Kormeeraha guud Don Grotting wuxuu dhageystay xubnaha bulshada wax ka beddelka Soohdimaha Dugsiga Dhexe. (<https://youtu.be/fRNwp9P1pNg>) Wuxuu dib u eegi doonaa natiijooyinka iyo talooyinka Guddiga La-talinta ee MSBA wuxuuna qaadan doonaa go'aanka ugu dambeeya ee lagu dhawaaqi doono Jimcaha, Nofeembar 6. Kadib wuxuu u soo bandhigi doonaa go'aankiisa Guddiga Dugsiga si ay uga fiirsadaan Noofambar 30. Gudiga waxey siin doonnan ogolaasho Diseembar 14, sida ku xusan [Policy JC](#).

Kormeeraha guud wuxuu jeclaan lahaa inuu u mahadceliyo xubnaha Guddiga La-talinta ee MSBA shaqadooda iyo sida ay ugu hureen hawshan adag. Wuxuu sidoo kale jeclaan lahaa inuu uga mahadceliyo bulshada waxqabadka iyo kaqeybgalka inta howshu socoto.

Wadooyinka Nabdoon ee Iskuulka - Talooyin Muhiim ah oo Safar Ammaan ah ee Deyrtan

Axadii, Nofeembar 1, Kaydinta Iftiin-maalintu way dhammaatay, taasoo la micno ah inay goor hore mugdi noqoneyso. Ayadoo ay maalmuhu gaaban doonnaan waqtigan sanadka, dhamaan dadka isticmaala wadada waa inay feejignaan dheeri ah muujiyaan. Halkan waxaa ku yaal talo soo jeedinno lagu caawinayo qof walba inuu nabad galo:

- Xiro dhar ifaya oo dhalaalaya markaad soconayso ama is dhaqdhaqaaqeyso.
- Ha u maleynin in dadka wada ay ku arki doonaan. Isha ku fiiri intaadan goyn gawaarida hortooda.
- Indhaha iyo dhegaha fur, gaar ahaan intaad goyneyso wadada.
- Baaskiilleydu waa inay hubiyaan inay lahaadaan nalalka oo ay xirtaan koofiyadaha. Waa sharciga.
- Wadida ama baaskiileynta? Taxaddar dheeri ah muuji oo tartiib ugu soco mugdiga iyo roobka. Ka feejignow dadka lugeeynaya ama baaskiillada isgoysyada, jidadka la maro (calaamadeysan oo aan calaamadeysneyn), wadooyinka baaskiilka iyo aagagga dugsiga. Xusuusnowna, qoraal ha dirin oo hana wadin.

Xafladaha Soo Socdo

Kulanka shaqada ee Gudiga Iskuulka

Isniin, Nofeembar 16, 2020

6:30 p.m.

[Meeting Materials](#)

Kulankan guddiga wuxuu u heellan yahay ka wada hadalka arrimaha khuseeya Saraakiisha Kheyraadka Dugsiyada (SROs), oo ay ku jiraan natiijooyinka sahanka bulshada ee xagaagii. Haddii aadan awoodin inaad kaqaybqaadato sahankan, aragtidaadu isbadashay ama hayso macluumaad dheeri ah oo aad la wadaagto, fadlan xor u ahaaw inaad Gudiga siiso faallo qoraal ah.

Faallooyinka Dadweynaha waa la aqbali doonaa laga bilaabo Khamiista, Nofeembar 12 markay tahay 12 pm. illaa Isniinta, Nofeembar 16 markay tahay 12 pm.